Taageerida Dadka Barnet

Ku-taageerida dadka nugul siday u maamuli lahaayeen, joogtayn lahaayeen ama uga guuri lahaayeen meelahay waqtigan degan yihiin

Tusmada

- Waa maxay Taageerida Dadka? 1
- Yaa heli kara Adeegyada Taageerida Dadka? 2
- Waa maxay taageerida la xiriirta guryaha? 3-4
- Waqti intee le'eg ayaa adeega la bixinayaa? 4
- Waa maxay farqiga u dhaxeeya daryeel iyo taageero? 5
- Adeegyadee baysan daboolin miisaaniyada Taageerida Dadka? 5
- Ma lacag baa lagu dalacayaa adeegyada? 6
- Maxaa laga filayaa guriyeenta la xiriirta khidmada kaalmada 7
- Ma laga doonayaa adeegyada taageerida dadka inay gaaraan heer la aqbali karo? 8
- Diiwaanada kuu gaarka ah 9
- Xaalado la daraaseeyey 10-12
- Sidee baan u heli karaa adeegyadan? 14
- Noo sheegida fikradaad ka haysatid Adeegyada Taageerida Dadka 15
- Sidee noola soo xiriiri kartaa 16
- Ma kula tahay in waraaqahan la sii hagaajin karo? 17

Waa maxay Taageerida Dadka?

Taageerida Dadka waa barnaamij dawladeed oo ah heer qaran kaasoo maalgeliya **adeegyada la xiriira taageerida guryaha,** si ay u caawiyaan dadka nugul sidii ay ugu noolaan lahaayeen si madax-banaan.

Kooxda Taageerida Dadka waxay maamulaan barnaamij Xaafada London ee Barnet waxayna mas'uul ka yihiin:

- Inay lacag siiyaan ururada kale si ah u bixiyaan taageeradaas
- Ay hubiyaan in adeega taageeradu uu ahaado mid tayo fiican intii macquul ah
- Inay ogaadaan waxyaalaha adeegyada cusub u baahan yihiin.

Yaa heli kara Adeegyada Taageerida Dadka?

Taageerida Dadka waxay caawin kartaa in badan oo ka mid ah dadka nugul (dayacan) ee qaangaarka ah, tusaale ahaan:

- Dadka waayeelka ah ee u baahan in guriga lagu caawiyo
- Dadka qaba xaalado caafimaadeed oo la xiriira dhimirka
- Dadka waxbarashadu ku adagtahay
- Dadka qaba naafanimo jirka ah iyo/ama dareenka ah
- Dadka qaba HIV ama AIDS
- Dadka qaba dhibaatooyinka mukhaadaraadka ama khamriga
- Dadka khatarta u ah gacan ka hadalka guriga
- Qoysaska guri laawayaasha ah ee u baahan in la caawiyo
- Dadka dhalinyarada ah ee khatarta u ah inay noqdaan guri laawayaal kuwaasoo isku rogaya dambiilayaal ama si khalad ah u isticmaalaya mukhaadaraadka ama khamriga
- Dhalinyarada ka tagaya daryeelka dowlada hoose
- Dhalinta yare ee waalidka ah
- Kuwii horey dambiga u galay ee khatarta u ah inay mar labaad dambi galaan
- Socdaalayaasha

Waa maxay taageerida la xiriirta guryaha?

Kaalmada la xiriirta guriyaynta waxay ujeedadeedu tahay inay caawiso dadka isku filan oo ku nool guryahooda ha ahaadaan kuwo la kireeyey ama si gaar ah loo leeyahay.

Adeegyadaas waxaa maamula ururo aad u kala duwan sida midowga ururada guryaha, ururada khayriga ama kownsalka. Adeegyaddas waxaa lagugu siin karaa gurigaaga ama meelo kale sida:

- Guryaha la kaalmeeyo
- Guryaha la wada dagan yahay
- Guryaha ku meel gaarka ah ee loogu tala galay guri laawayaasha ah
- Hosteelada ama meelaha naaguhu ku cararaan.

Waxaa jira labo adeeg oo muhiim ah oo la heli karo:

- **Kaalmada aan joogtada ahayn** - halkaasoo kaalmada lagugu siinayo gurigaaga. Goorta aan kaalmadaas loo baahneyn waa la joojin karaa si loogu isticmaalo qof kale.
- **Kaalmo ku saleeysan guri** - kaasoo kaalmada iyo gurigaba la bixiyo iyagoo wada jira.

Kaalmada waxaa ku siinaya adeegaha taageerada, ilaaliye, ama maamulaha dhismaha, kaasoo awood u yeelan kara inuu kaa caawiyo:

- Ineey kuu helaan meel aad ku noolaatid gurina kuu sameeyaan
- Haynta badbaadinta iyo amaanka guryahaada
- Bixinta biilalkaaga iyo inay maamulaan lacagtaada
- Inay maamulaan kiradaada
- Inay buuxiyaan foomamka iyo waraaqaha kale ee shaqada
- Inay dalbaan kaalmada dowlada ee aad xaq u yeelan kartid
- Inaad yeelatid xirfadaha nolosha
- In la fududeeyo shaqaalaynta iyo tababarada
- In la fududeeyo helitaanka adeegyada kale sida waxbarashada, caafimaadka ama adeega bulshada.

Si aad u heshid adeeg ku haboon baahidaada, fadlan booqo Liisk Adeega ee aad si tooska uga heli karto internetka cinwaanka Taageerida Dadka Barnet ee ah **www.supportingpeople.barnet.gov.uk**

Waqti intee le’eg ayaa adeega la bixinayaa?

Adeega Taageerida waxaa loo qaybin karaa mid wakhti gaaban ah iyo mid wakhti dheer ah.

- **Kaalmada wakhtiga gaaban** waxaa la bixinayaa ilaa labo sanno.
- **Kaalmada wakhtiga dheer ah** waxaa loo bixinayaa si joogto ah ugu yaraan labo sano.

Waa maxay farqiga u dhaxeeya daryeel iyo taageero?

Barnaamijka Taageerida Dadka wuxuu daboolaa kaalmada ee ma daboolo daryeelka

- **Daryeelku** waa caawinta qof waajibaadkiisa goonida u ah ee aysan iyagu samaysan karin, tusaale ahaan, qubeyska iyo dhar gashiga. Wakhti kadib dadka waqtigan u baahan daryeelka waxay u sii baahnaan karaan kaalmo dheeraad ah.

- **Taageerada** waa in lagu caawiyo dadka inay wax u samaystaan naftooda maxaa yeelay ma yaqaanaan sida loo sameeyo ama ma qabaan kalsooni ay ku samaystaan.wakti k dib dadkaan waxay awood u yeelanayaan inay iyagu bartaan sida loo sameeyo una baahan maayaan caawimaad mar kale.

Adeegyadee baysan daboolin miisaaniyada Taageerida Dadka?

Taageerida Dadka ma bixinayso adeegyada daryeelka, sida:

- Adeegyada guryaha - sida adeega dukaamaysiga, beer-hagaajinta ama nadiifinta
- Daryeelka qofka u gaarka ah - sida mayrashada iyo dhar gashiga
- Daryeelka caafimaadka ama daaweeynta
- Daaweynta ama talo-bixinta takhasuska ah
- Caruur-haynta

Ma lacag baa lagu dalacayaa adeegyada?

Waxaan ku bixinaa Adeegyada Taageerada kaalmada dadka lacagta dowlada. Inta badan dadka isticmaala Adeegan ma haystaan waxay ku bixiyaan. Taageerada bixiya kaalmo wakhti gaaban ah ilaa iyo labo sanno wax lacag ah laguma dalaco.

Adeegyada kale lacag baa lagugu dalacayaa laakiinse waxba bixin maysid haddii lagaa bixiyo kirada ama aad u qalantid lacag celin.

Haddii dawladu kaa bixiso Kirada Guriga, lacagta lagugu dalaco waxaa bixinaya iyadoo dhameeystiran kuwa dadka u kaalmeeya. Tan waa la bixin doonaa adigoo lagu matalayo si toos ah qof walba oo ku siiya Adeega taageerida Dadka dadka (adeeg bixiyaha).

Hadii aadan qaadan kirada guryaha ee dawladu bixiso, waxaad u baahan tahay inaad adigu bixisid lacagta lagugu dalacay sidaad kiradaadaba u bixisid. Haddii aadan u qalmin inay dowladu kirada ay bixiso waxaad xaq u yeelan kartaa xoogaa caawimid ah oo ah lacagta Taageerida Dadka adigoo weeydiisanaya “qiimeeynta lacag ku dalacida cadaalada ah”. Haddii aad sidaas doonaysid la xiriir adeeg bixiyaha si uu ula xiriiro kownsalka kuuguna weydiiyo “qiimeynta lacag ku dalacida cadaalada ah”.

Haddii aad jeclaan lahayd faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan siyaasada lacag ku dalacida ee kownsalka, fadlan la soo xiriir Adeega Bulshada Dadka Qaangaarka ah, Maamulaha Xiriirinta oo teleefoonkiisu yahay 020 8359 4463 si aad u weydiisatid buugyaraha.

Maxaa laga filayaa guriyeenta la xiriirta khidmada kaalmada

Taageerada Dadka ee Kownsalka Barnet waxay heshiis qoran la leeyihiin kaalmo bixiyaha (mararka qaarkood mulkiilaha gurigaaga) si laguu siiyo kaamo tayo leh oo la xiriirta guryaha taasoo kugu caawin karta inaad u noolaatid si madax-banaan.

Guriyeentaada la xiriirta khidmada kaalmada waxaay noqon doontaa:

- In la qiimeeyo baahidaada taageerada guryaha, haddii aad dooneeysidna waxaa lagu dari karaa xubin ka mid ah qoyska ama daryeelaha
- In la qoro “qorshe taageero” kaasoo sharxaya caawinaada aad u baahan tahay si uu u sii jiro madax-banaanidaada, iyo sidaad u jeclaan lahayd inaad awood u yeelatid inaad hagaajisid madax-banaanidaada
- In si joogto ah dib loogu eego qorshaha taageerada
- In la hubiyo inaad garaneeysid sidaad uga faaloon laheyd ama uga dacwoon laheeyd adeegyada taageerada ee la xiriirta guryaha
- In la hubiyo inaad dareentid amaan aadna ogtahay waxa la sameeyo xaaladaha degdeg ah
- In la hubiyo in macluumaadka aad heshaa uu ku qoran yahay luuqadaad dooneeysid, iyo in la hubiyo in khidmadu ay dhaqan ahaan kugu haboon tahay.

Ma laga doonayaa adeegyada taageerida dadka inay gaaraan heer la aqbali karo?

Iyadoo la tixraacayo Taageerida Dadka, adeeg bixiyaasha waa inay hubiyaan adeeyadooda Taageerida Dadka inay tahay mid gaarsiisan heer la aqbali karo. Waxaan doonaynaa inaan hubino in dhamaan adeegyada ay yihiin:

- Tayo sare
- Ineey daboolaan dadka baahidooda
- Inay siiyaan dadka Barnet adeeg u qalma lacagta ku baxda.

Kooxda Taageerida Dadka waxay hubiyaan in adeegyada ay gaareen heerkiui laga doonayay. Haddii ay jiraan welwel muhiim ah, waxaan sameyn doonaa dib u eegid adeega oo idil waxaana loo baahan hagaajin in la sameeyo.

Waxaan rabnaa inaan la hadalno dadka isticmaala khidmada, daryeelayaashooda iyo qof walboo kale oo ay khuseeyso khidmada, si loo ogaado fikrada ay ka qabaan adeegaan. Waxaan isticmaali doonaa macluumaadkaad na siisay si loo sameeyo qorshe lagu hormariyo khidmada. Waxaan kaloo jeclaan lahayn inaan ogaano adeegyadda is leedahay waa loo baahan yahay. Raadi ogeeysyiiyo ku saabsan kulamada ama nagala soo xiriir teleefoonka lambarkiisu yahay **020 8359 4264** si aad noola socodsiisid fikradaadu waxay tahay.

Diiwaankaaga kuu gaarka ah

Qayb ka mid ah dib u eegida adeegan waxaan u baahan karaa inaan eegno macluumaadkaaga qof ahaaneed, tan waxaa loola jeedaa in la eego qaar ka mid ah macluumaadka qofka sida qorshayaasha taageeradak. Waa muhiin inaan tan sameeyno sidaas awgeed waxaan xaqiijin karnaa in diiwaanka uu ku hayo heerka loogu tala galay adeeg bixiyahaaga sidoo kalena in la hubiyo in adeeg bixiyahaaga uu raaco siyaasadihiisa iyo nidaamkiisa.

Macluumaad walba waxaa si sir ah loogu xafidayaa si shakhsiyeed ah oo xafidanm. Wax diiwaan ah lama sawirayo ama dibada loo qaadi maayo sidoo kale wax magacyo ahna laguma xusayo warbaxintayada inaad adigu si gaar ahna noo weydiisatid mooyaane inaan sidaas sameyno.

Sida ku xusan Xeerka Ilaalinta Xogaha 1998 waxaad xaq u leedahay inaad ogaatid macluumaadka shakhsiyeed ee aan adiga kaa hayno, waxa loo isticmaalayo macluumaadkaas, iyo qofka lala qaybsanayo macluumaadkaas. Kownsalka Barnet wuxuu soo saaray siyaasad lagu caawinayo adeega bulshada iyo shaqaalaha kale ee ah daryeelayaasha bulshada si loogu diiwaan geliyo macluumaadka habka ugu wanaagsan.

Haddii aad wax su’aal ah ka qabtid macluumaadkaaga, fadlan nagala soo xiriir teleefoonka ah 020 8359 4264.

Xaalado la daraaseeyey

Halkaan waxaa ku sugan daraasad lagu sameeyey xaalad nololeed run ah taasoo ah sida barnaamijka Taageerida Dadka uu u caawinayo dadka nugul ee ku sugan Barnet

Mudane F waxuu lumiyey gurigiisi waxuuna ka go'ay qoyskiisa maadaama uu ku duloobay khamri. Waxuu yimi hostel lagu taageero dadka guri-laawayaasha ee kelida ah waxuuna helay kaalmo taasoo awood u siisay inuu si dhameeystiran uga baxo caadeeysigii, xaliyo xaaladaha keenaya dhibaatada uuna dib u dhiso xiriirkii isaga iyo qoyskiisa. Waqtigan wuxuu ku nool yahay guri kownsal ah, wuuna fiican yahay, waxuuna awoodaa in ilmahiisa iyo kuwuu awoowga yahay ineey booqdaan, taasoo aan dhici karin wakhtigii uu cabayey khamriga.

Marwo T waxay timi Adeega Taageerida Gacan Ka-hadalka guriga ee aan joogtada ahayn markay adeega taageerida ka maqashay kaaliyaheeda caafimaadka. Marwo T waxay sannado dhowr ah kala kulantay gacan ka hadalka guriga ninkeedii hore. Inkastoo ay kala tageen, waxuu guriga ugu soo noqon jiray si joogto ah si uu u bajiyo una aflagaadeeyo, inta badan carruurtooda horteeda. Waxaa loo qoondeeyey shaqaale taageere ah kaasoo dhageystay, u sharxay fursadaheeda lana sameeyey qorshe taageereed, taasoo go'aansaty inay u tagto dowlada hoose si loo siiyo deegaan deg deg ah iyo qareen xaafada ah si looga reebo. Marwo T waxay markii xigtay u guurtay deegaan ku meel gaar ah ee kaga yaala xaafada meel kale taageeraheeda shaqaaleed waxuu awooday inuu qoyska siiyo kaalmo caadifi ah ama la taaban karo, iyadoo khidmadaha fasax u siineeysa, meeshii ku haboon, khidmad bixiyaasha kale. Waqtigan 12 bilood kadib, Marwo T iyo carruurteeda waxay ku xasileen deegaankooda cusub, ciyaalkeeda waaweyn way ku faraxsan yihiin iskuulkooda iyadoo taageeriduna ay u socoto, MarwoT kalsoonideedii way kortay waxayna hada tixgalineeysaa ineey casharo ka qaadato kuliyada.

Marwo J waa qof waayeel ah qabtan dhibaatooyin caafimaadeed oo xaga madaxa ah. Sanado badan bay caawimad ka heleeysay Adeegayaasha Bulshada waxayna wakhti dheer ku jirtay dhakhtarka. Kadib joogitaankedii ugu dambeeyey dhakhtarka waxaa lo gudbiyey khidmada taageerida joogtada ah si loogu caawiyo ineey gurigeeda ku noqoto. Baahideedii waa la qiimeeyey Marwo J waxayna go'aansatay inay doorbideeyso inay ku noolaato sheltered housing service, intay ku noolaan laheeyd guri kaasoo ay ku dareentay cidlo ayna ku adkaatay inay ku noolaato. Adeegaha taageerada ayaa ku caawiyey inay codsado guri noocaan ah waxuuna u raacay inay soo aragto guryaha. waqtigan waxay u guurtay guryaha dadka la kaalmeeyo waxayna kula saaxiibtay dad kale oo leh taariikh dhaqameed keeda la mid ah. Cidla ma ahan waxana ku raaxeysataa wehelka iyo sida dadka meesha degan loogu dhiira geliyo inay ka qaybgalaan. Adeegaha kaalmada farahuu ka qaaday caawimadeedii markeey degtay, kaalmadiina waxuu ku wareejiyey maamulaha guryaha dadka la kaalmeeyo sidaa awgeed Marwo J waxa wadaa inay hesho kaalmada ay u

Sidee baan u heli karaa adeegyadan?

Fadlan nagala soo xiriir haddii aad daneyneysid helida adeega Taageerida Dadka ama aad jeceshahay inaad ogaatid waxa la heli karo.

Tel	020 8347 2223 -	haddii ka weyn tahay 60 sano
Tel	0800 389 5225 -	haddii aad tahay kirayste Guryaha Kownsalka Barnet
Tel	020 8343 6483	dhamaan su'aalaha kale
Qoraal-Hadle	18001 020 8356 4264 (isticmaalaha teleefoonka qoraalka ah)	
Iimayl	supportingpeopleteam@barnet.gov.uk	
Saldhiga internetka	www.supportingpeople.barnet.gov.uk	

Noo sheegida fikradaad ka haysatid Adeega Taageerida Dadka

Waxaan rabnaa inaan ku maqalno haddii aad Adeega Taageerida Dadka. Adeegyada intooda badan waxay qabtaan kulamo si ay u muujiyaan aragtiyadooda, ama waxay kugu casumi karaan inaad buuxisid su'aalo. Macluumaadkaan waxuu ku caawinayaa adeegyada inay ogaadaan waxa si wanaagsan u shaqeeynaya iyo hagaajinta dadku rabaan inay arkaan.

Haddii aad jeclaan laheyd inaad sameeysid faalo, amaanid ama eedeeyn ku saabsan addegyada aad heshid, waa inaad la xiriirtaa ururka dhiiba adeega marka ugu horeeysa. Dhamaan adeeg bixiyaashu waa inay qabaan nidaam dacwo oo qoran.

Haddii aad dooneeysid waxaad kala xiriiri kartaa Kooxda Taageerida Dadka teleefoonka ah:

Tel 020 8359 4264

Iimail supportingpeopleteam@barnet.gov.uk

Haddii kale, waxaad kala soo xiriiri kartaa Sarkaalka Dacwadaha Kownsalka oo ah:

Tel 020 8359 5730

Fakis 0870 889 7448

Waraaqaha ku soo hagaaji: Complaints Manager
London Borough of Barnet
FREEPOST NAT 8011
London N11 1BR

Sidee noola soo xiriiri kartaa

Waxaad ula soo xiriiri kartaa Kooxda Taageerta Dadka hababka soo socda:

Tel 020 8359 4264

Qoraal-Hadle 18001 020 8356 4264 (isticmaalaha teleefoonka qoraalka ah)

Iimayl supportingpeopleteam@barnet.gov.uk

Saldhiga Internetka www.supportingpeople.barnet.gov.uk

Waraaqaha ku soo hagaaji:
The supporting people team
Barnet Council
Barnet House
1255 High Road
Whetstone, N20 OEJ

Waxaa jira saldhiga internetka ee **Taageerida Dadka Qaranka** kaasoo ku siinaya macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Taageerida Dadka sidoo kale waxaad la helaysaa Liiska Adeegyada Taageerida Dadka. Wuxuu qoraa liiska dhamaan adeegyada Barnet iyo wiliba kuwa ku yaala wadanka dacaladiisa, wuxuuna kuu sheegayaa qofka aad kala xiriiri kartid si aad u heshid macluumaad dheeraad ah.

Saldhiga internetka www.spkweb.org.uk

Ma kula tahay in waraaqahan la sii hagaajin karo?

Fadlan noo soo sheeg siduu kala yahay waraaqahan iyo wiliba haddii aad haysid wax fikrad ah oo aad isl leedahay waa lagu sii hagaajin karaa.

Fadlan kala soo xiriir
Maamulaha Xiriirinta:

Tel: 020 8359 4463

Fakis: 020 8359 4182

Kaarka Tarjumida

If you would like help with translating any part of this publication into your language or would like it in a different format, please tick one box , write your name, address and phone number, and send to the address shown.

Nëse ju duhet e përkthyer informata e bashkëngjitur, ju lutem shënjoni kutinë dhe lëvizni në adresën e mëposhtme duke dhënë emrin, adresën dhe numrin tuaj të telefonit në vendin e dhënë. **Albanian** ☐	如果你需要將這本小冊子的部分翻譯成中文的話，請在適當的方格內打「✓」，在空欄寫下你的姓名、地址和電話號碼，然後將這表寄到下方的地址。 **Cantonese** ☐	اگر برای ترجمه هر قسمتی از این نشریه به زبان خود به کمک احتیاج دارید، لطفاً جعبه زیر را علامت بزنید، اسم، آدرس و شماره تلفن خود را بنویسید و به آدرسی که نشان داده شده بفرستید. **Farsi** ☐
"Si vous souhaiteriez avoir de l'aide avec la traduction de cette publication dans votre langue, cochez s'il vous plaît la case ci-dessous, et écrivez votre nom, adresse et numéro de téléphone, et envoyez à l'adresse indiquée." **French** ☐	જો આ પ્રકાશનનો કોઈ પણ ભાગ તમારી ભાષામાં ભાષાંતર કરવામાં મદદ જોઈતી હોય, કે તે જુદા ફોર્મેટમાં જોઈતો હોય, તો કૃપા કરીને એક બોક્સ પર ટીક કરો, તમારું નામ, સરનામું અને ટેલિફોન નંબર લખો, અને બતાવેલા સરનામે મોકલો. **Gujarati** ☐	Si quiere ajuda com a tradução de qualquer parte desta informação, por favor, marque a caixa em baixo, escreva o nome, o endereço e o número de telefone, e mande ao endereço aqui mostrado. **Spanish** ☐
Haddii aad doonayso in qayb ka mid ah daabacaadaan lagaaga tarjumo luqadaada, fadlan calaamadee sanduuqan hoose, ka qor magacaaga, cinwaankaaga iyo lambarka telefoonka, kadibna u soo dir cinwaanka ka sarreeya. **Somali** ☐	Se quiser ajuda com a tradução de qualquer parte desta informação, por favor, marque a caixa em baixo, escreva o nome, o endereço e o número de telefone, e mande ao endereço aqui mostrado. **Portuguese** ☐	اگر آپ کو اس اشاعت کے کسی حصے کا ترجمہ اپنی زبان میں کرانے یا اسے کسی مختلف شکل میں درکار ہو تو براہ کرم ایک خانے پر نشان لگائیں، اپنا نام، پتہ اور ٹیلیفون نمبر لکھیں اور نیچے دیے گئے پتے پر بھیج دیں۔ **Urdu** ☐

Luqado kale:

Cajilad Maqal ☐ CD ☐ Ku xifdisan Kombiyuutar ☐

Farta Indhoolayaasha ☐ **Farta Waawayn** ☐

Magacaaga:
Cinwaankaaga:

Sumada Boostada (Post code)

Tel:

Fadlan dib ugu soo dir:
Communications Manager for Adult Social Services,
London Borough of Barnet, Barnet House
1255 High Road, Whetstone, N20 OEJ